



**BADBAADADA
dabka ee guriga**

Tusmada

Nolol-maalmeed badbaadada dabka waafaqsan sida ay uga jiri karto guri kasta.....	3
Agabka dabka hore lagu damiyo iyo isticmaalkooda.....	4
Guri badbaado ah oo nadiif ah.....	5
Badbaadada dabka ee jikada	6
Solidda ama dubidda cuntada iyo agabka solidda loo adeegsado ee gaaska, dhuxusha ama alwaaxa ku shaqeeya.....	7
Agabka korontada ku shaqeeya iyo baytariyada.....	8
Isticmaalka badbaadada ah ee sawnada	9
Goobaha dabka lagu shito iyo nadiifinta mariinada qiiqa	10
Mariinada jaranjarta ee dhismaha dabaqa ah ha dhigin alaab	11
Shamacyada, laambadaha yaryar iyo dabka bannaanka laga shido.....	12
Haddii uu dab kaco sida ay tahay in la yeelo	13
Carruurta bar oo la tababaro xirfadaha badbaadada.....	14
Ku talagal khalkhalada iyo xaaladaha kediska ah ee kala duwan.....	15
Waxaa mar walba Finland diyaar loogu yahay badbaadinta shacabka.....	16



Nolol-maalmeed badbaadada dabka waafaqsan sida ay uga jiri karto guri kasta

Guriga ammaanka ah inaga oo dhan ayuu muhiim inoo yahay. Baro aasaasiga ammaanka dabkicinta oo ku talo gal xaaladaha dabku dhasho, taas ayaad ku suuro galinaysaa in adiga iyo qoyskaaguba niyadsami aad ku joogtaan.

Qoraalkan waa qoraal hagitaan ah oo ay si wadajir ah uga soo shaqeeyeen xarumaha badbaadada ee Uusimaa ku yaalla, waxaanad ka helayasaa talooyinka ugu muhiimsan. Si wadajir ah ehelkaaga ula akhriso talooyinkan.



Ka hor tag inuu dab dhasho:

- Hubi in gurigaaga ay yaallaan dabsheegeyaal ku filan. Si joogto ah ula soco oo u hubi inay shaqeynayaan. Laga bilaabo sannadka 2026-da shirkadaha guryaha iska leh ayaa ka mas'uul ah in guryaha ay yaallaan dabsheegeyaal ku filan.
- Baro jihooyinka dhismaha lagaga baxo. Hubi in goobaha la maro sida daaradaha oo kale, ay mar walba faaruq ka yihiin wax xanibaad keeni kara oo in la maro adkeynaya.
- Agabka dabka hore lagu damin karo ha kuu ahaadaan kuwo aad si fudud u heli karto, waxaanad barataa sida loo isticmaalo.
- Shamacyo ama dab bannaan ha kaga tagin meel aanan laga kormeeri karin.
- Waxaad isticmaashaa oo kaliya agab koronto ku shaqeeya oo meelna aanan ka jabnayn.
- Markaad cunto karinayso goobta aad ku karinayso u joog oo ku kormeer.
- Guriga gudhiisa ha ku cabin sigaar.



Haddii uu dab kaco:

- Isku day in inaad ku damiso dabka agabka dabka in lagu damiyo loogu talo galay, laakiin ammaankaaga halis ha galinin.
- Badbaadi dadka guriga ku jira.
- Xidh albaabada iyo daaqadaha, markaasna ka bax guriga.
- Wac lambarka gurmadka degdegga ah ee 112 halkaas ayaa hagitaan lagaa siinayaa ay tahay inaad u hoggaansanaato.
- U wareeg meel ammaan ah oo bannaanka ah waxaanad hubisaa in ciidanka dabdamisku uu goobta soo gali karo.
- Ka warhay in gaadiidka ammaanku ay awoodayaan inay isticmaalaan waddadada ammaanka ee dhismaha ama shirkadda guriga.

Haddii aad rabto inaad su'aal naga waydiiso arrimaha badbaadada dabka la xidhiidha, waxaad la soo xidhiidhaa ilaaliyaha ammaanka dabka ee heeganka ah. Macluumaadka xidhiidhka waxaad ka heli kartaa ciwaanka internetka ee xarumaha ciidanka dabdamiska ee nawaaxiga ku yaalla www.pelastustoimi.fi

Nolol-maalmeed badbaado leh ayaan idiin rajeyneynaa!

Xarumaha ciidanka dabdamiska ee Helsinki, Itä-Uusimaa, Keski-Uusimaa iyo Länsi-Uusimaa



Agabka dabka hore lagu damiyo iyo isticmaalkooda

Inuu muwaadinku lahaado xirfadda daminta dabka hore waa muhiim, waxaayna kuu samaxaysaa inaad damin karto dab bilow ah oo aad ka hortagi karto dhaawacyada waawayn ee agabka soo gaadhi kara, xataa waxaad ka hortagi kartaa in gurigaagu uu dabku wada baabiiyo.

Haddii gurigaaga uu dab bilow ah ka kaco isku day mar walba inaad ugu horreyn ku damiso agabka dabka hore lagu damiyo. Haddii taas aanay suuro gal ahayn, xidh albaabada iyo daaqada, si degdeg ah guriga uga bax waxaanad wacdaa 112.

Agabka ugu muhiimsan ee dabka bilowga ah lagu damiyo waa bustaha dabdamininta iyo qalabka lagu buufiydo dabka. Sidoo kale baaldi biyo iyo tuumbada biyaha ee beeraha lagu waraabiyo ayaa xaaladaha qaar ku noqon kara kuwo ku habboon in dab lagu damiyo. Busteyaasha dabdamininta waxaad ka heli kartaa tukaamada raashinka ee waawayn qalabka dabka lagu buufiyana waxaad ka heli kartaa tusaale ahaan tukaamada qalabka dhismaha.

Guri badbaado ah oo nadiif ah

In guriga ay alaab badan taallo oo uu is dhex yaallo waxaay keentaa halis dab inuu ka kici karo ah. Si joogto ah u nadiifi guriga oo ka qaad alaabta dheeraadka ah.

- Si joogto ah u nadiifi agabka korontada ku shaqeeya oo ka nadiifi boodhka ku urura. Agabka boodhku uu ku ururay ee kululaada wuxuu kicin karaa dab.
- Ilaali in waddooyinka la maro ee bannaanka looga baxo ay bannaanyihiin kana qaad alaabta dheeraadka ah ee taalla. Tusaale ahaan birta lugta lagu riixo ama baaskiilka korontada ku shaqeeya haku jaarjarayn daaradda guriga. Hubi in albaabka bannaanka aad furi karto adiga oo aanan u isticmaalin fure. Ka warhay in daaqaduhu ay furmayaan oo si fudud loo gaadhi karo.
- Balakoonku nadiif ha kuu ahaado kana qaad alaabta dheeraadka ah.
- Istoodhka ku keydi alaabta halkaas loogu talo galay, ha dhigin daaradaha la maro.
- Geedaha dabka lagu shito ama agab kale oo guban kara ha dhigin hareeraha darbiyada dhismaha.



Badbaadada dabka ee jikada

Jikadu waa meesha ugu badan ee dabka guriga ka kacaa uu ka dhasho. Siyaabahan ayaad ku horumarin kartaa badbaadada jikada:

Showladda iyo foornada

- Cuntada markaad diyaarinayso goob-jooge ahaw inta ay karsamayso oo dhan.
- Dabi showladda markaad isticmaasho kaddib.
- Si joogte ah u nadiifi shaandhada laydhiyaha showladda.
- Showladda korkeeda ama foornada waxba ha ku keydinin mar walbana ilaali in showladda iyo hareeraheedu ay nadiif yihiin.

Dabsheegaha

- Sida caadiga ah laguma taliyo in dabsheege lagu xidho jikada, sababta oo ah qiqa cuntada ka dhalanaya ayaa keeni kara in dabsheeguhu uu ugu dhawaaqi si aanan loo baahnayn. Xasusnow si kastaba in gurigaaga qaybihiisa kale in dabsheege uu kuu yaallo ay muhiim tahay.

Agabka korantada ku shaqeeya ee guriga yaalla

- Tallaagada iyo hareeraha qaboojiyaha barafka huufar mari ugu yaraan hal mar sannadkii.
- Hubi xaaladda agabka korantada ku shaqeeya hana isticmaalin agab koronto ku shaqeeya oo jaban ama dhaawac uu soo gaadhay.
- Markaad makiinada weelka ama agabka kale ee korantada ku shaqeeya ee guriga yaalla isticmaalayso adiga oo kormeeraya oo goob-jooge ah isticmaal



DABKA DUFANKA KA DHASHA

Haddii saliid digsi ku jirta uu dab ka dhasho, ku dami bustaha dabdamiska ama daboolka digsigu. Dabka markaad hawada ka xidho wuu damayaa. Marnaba dab dufan ka dhashay ha isku dayin inaad biyo ku damiso, sababta oo ah waxaay keeni kartaa inuu dabku sii faafo.

QALABKA DABKA LAGU DAMIYO

Ka warhay in jikadaada meel dhow uu kuu yaallo bustaha dabdamisku. Agabka dabka lagu buufiyo si joogteysan u daryeel oo inuu shaqeynayo hubi.



Solidda ama dubidda cuntada iyo agabka solidda loo adeegsado ee gaaska, dhuxusha ama alwaaxa ku shaqeeya

Markaad isticmaalaysa agabka kala duwan ee solidda ama dubidda cuntada loo adeegsato mar walba ha kaa garab dhawaadaan qalabka dabka hore lagu damiyo.

Sidoo kale la soco oo ku talo gal digniinaha gubashada dhulka ee jira, waxaad digniinahaas ka heli kartaa bogga internetka ee xarunta Aqoonta cimilada (www.ilmatieteenlaitos.fi).

Marka ay jirto digniinta gubashada dhulku ma bannaana in dab furan la shido ama la isticmaalo agabka cuntada lagu solo ama lagu dubo ee hal mar la isticmaalo.

Agabka solidda ama dubidda cuntada ee gaaska ku shaqeeya

- Guga marka la gaadho hubi in agabka solidda, tuumbada dareeraha iyo haanta gaaskuba ay shaqeynayaan oo xaaladdoodu ay caadi tahay. Tuumbada gaaska dareeraha ah shaamadadda ku taalla ayaa sheegaysa taariikhda la soo saaray.
- Dhinacyada ka laalaab tuumbada oo hubi inaanay wax dillaac ah lahayn. Haddii tuumbadu ay dhaawacantahay mid cusub ku beddel.
- Marka aad agabka cuntada lagu solo shidayso ha ku dul foorarsan gubaha gaaska.
- Hanida haanta gaaska mar walba oo aad ka dhameysato isticmaalkeeda xidh.
- Agabka cuntada lagu solo ka nadiifi dufanka hadhaaga ku ah.

Agabka cuntada lagu solo ee dhuxusha ama alwaaxa ku shaqeeya

- Agabka cuntada lagu solo waxaad dhigtaa meel aanan guban karin oo in ku filan u jirta maatarada kale ee hareeraha ka yaalla.
- Dareeraha dabka lagu kiciyo ha ku shubin dhuxusha dabku ka baxayo.
- Dambaska waxaad ku wareejisaa weel bir ah oo dabool leh. In dambasku uu qaboobo maalmo badan ayaay qaadan kartaa.
- Alwaaxda dabka lagu shido ku keydi meel kale oo aanan ahayn hareeraha darbiyada dhismaha.

Agabka korontada ku shaqeyya iyo baytariyada

Dabka ka kaca agabka korontada ku shaqeyya badankiisu waxaa sabab u ah agabka oo jaban, in laga taxaddari waayo isticmaalkiisa ama in taxaddar la'aan guud ay jirto.

Waa inaad hubisaa

- agabka korontada ku shaqeyya ee gurigaagu aynan jabnayn oo ay nadiif yihiin
- in godadka madaxa fiilada la galiyo, nalka meelagha laga shido iyo korontooyinka kuwaas ku xidhanba ay yihiin kuwo si fiican ugu xidhan oo nadiif ah.

Jaarjaraynta baytariyada

Qaab badbaado ah u jaarjaree agabka korontada ku shaqeyya (tusaale ahaan taleefanada gacanta, tableedyada, kombiyuutarada, cadayada korontada ku shaqeyya, baaskiileedada iyo mootooyinka):

- Markaad jaarjareynayso u isticmaal agabkaas qalabka in lagu jaarjareeyo loogu talo galay.
- Adiga oo kormeeraya jaarjaree oo soo jeeda. Adiga oo hurda habeenkii ha ku dayn jaarjiga.
- Inta uu u baahanyahay in ka badan ha jaarjarayn, taasi waxaay kordhinaysaa halista gubashada baytariga.
- Baytariyada ku jaarjaree oo ku kaydi meel furan oo ay ku rakibantahay dabsheege shaqeynaya.
- Korontada aad ku jaarjarayneyso si toos ah uga qaado godadka madaxa fiilada la galiyo.
- Ka fuji korontada aad jaarjiga u adeegsanaysay derbiga marka aad agabkaaga jaarjaraysatay.
- Baytariga haku kaydinin daaradaha iyo meelaha la midka ah ee loo adeegsado in guriga looga baxco.
- Baytariyada gaboobay ama anan shaqeyneynin gee goobaha la geeyo alaabta la soo isticmaalay ee dib looga sii faa'idaysan karo (kierrätyspiste).

Baytteri haddii uu dab ka kaco sidan yeel


Waxaa adkaan kartaa in la damiyo baytari uu dab ka kacay. Waxaa laga yaabaa inuu baytariga dabku uu ka kacay uu "qarqarxo" oo qiiqa ka soo baxayaana uu noqdo mid sun ah. Sida ugu fiican ee loo damin karo waa in la qabooyiay baytariga. Sidan yeel:

- Baytariga ka fuji derbiga haddii ay macquul tahay.
- Haddii ay macquul tahay baytariga waxaad gaysaa meel ammaan ah oo uu ku qaboobi karo, adiga oo iskaga qabanaya maro culus ama bustaha dabdamiska.
- Isku day inaad baytariga qabooyiso. Tusaale ahaan taleefanka waxaad ku dhex ridi kartaa baaldi ay biyo qabow ku jiraan.
- Baytariga gubanaya qiiqa ka soo baxayaa aad ayuu u sun badanyahay – iska ilaali oo ha neefsan qiiqaas.

Waxaa macquul ah in baytariga la damiyay uu dib dab uga kaco. Hubi in baytarigu uu yaallo meel haddii uu dab dambe ka kaco aanu faafaynin dabkaasi. Guriga ka bax, albaabka xidh oo wac 112.



Isticmaalka badbaadada ah ee sawnada




Finland waxaa sannad kasta ka dhaca 400 oo dab oo ka kacay sawnada. Badanaa waxaa sabab u ah in si khaldan loo isticmaalay sawnada.

Sawnadaada si badbaado ah u isticmaal oo raac hagitaanadan:

- Markaad bilowdo inaad sawnada diiriso, hubi in burjikada sawnada korkiisa aanay waxba saarnayn.
- Marka aad sawnada kululeynayo adiga oo guriga jooga oo kormeeri kara kululee. Sawnada oo shidan ha ka bixin guriga.
- Fuyuuska ka saar, haddii burjikada sawnada aanad muddo dheer isticmaalayn.
- Dharkaaga ku wadho oo ku qalaji meel aanan sawnada ahayn.
- Alwaaxda lagu fadhiisto ee sawnadu faaruq ha ahaadaan oo alaabta dhigo meel aanan sawnada ahayn.
- Xasuuso inaad si joogto ah ula socoto xaaladda burjikada sawnada. Dhagaxaanta ka baddal ama ku kordhi haddii loo baahdo.

Haddii aad leedahay sawna alwaax lagu kuleynayo:

- hubi in daboolka birta ah uu furanyahay marka aad bilaabayso kululeynta. Waxaad daboolka birta ah ku daboosha marka dabku uu gabi ahaanba damaay oo aanu holac ka baxaynin.
- hubi in sanduuqa aany ka firdhaynin holocu marka aad sawnada kululaynayo.
- ka warhay sifeynta joogtada ah ee marinada uu qiiqu maro. guryaha sannadka dhan la isticmaalo ama guryaha wakhtiga firaaqada ah ee sida joogtada ah loo isticmaalo waa in mariinadooda qiiqu uu maro sannad kasta la nadifiyaa.
- gurigaaga soo dhigo qiiq sheegaha karboon hal-ogsaydhka.



Goobaha dabka lagu shito iyo nadiifinta mariinada qiiqa

Ilaali nadaafadda goobaha dabka lagu shito ee ku yaalla gurigaaga ama gurigaaga wakhtiga firaaqada. Guriga ay ku yaallaan goobo dab lagu shito waxaa lagu taliyaa in lagu rakibo qiiq sheegaqa karbon hal-ogsaydhka.

- Goobta dabka lagu shido waxaad ku shiddaa oo kaliya geedo ama alwaax qalalsan – ha ku shidin qashin, tusaale ahaan kartoomada caanuhu ka dhamaaday ama qashin kale.
- Goobaha dabka lagu shido u isticmaal sida uu hagitaanku yahay, waxaad shiddaa geedo ku filan markiiba.
- Geedaha dabka aad ka shidayso halka kore ka shid. Laydh fiican ha marto meesha aad dabka ka shidayso, taas waxaay fududeyneysaa in dabku uu si nadiif ah u gubto.

Nadiifinta mariinada qiiqa

Goobaha dabka lagu shido iyo mariinada qiiqa in si joogto ah loo nadiifiyo waxaay qayb ka tahay badbaadada dabka ee dhismaha. Qofka mariinada qiiqa nadiifinaya waa inuu lahaadaa xirfaddeeda. Nadiifinta mariinada ka dalbo shirkadaha ku tukhasusay.

Dhismeyaasha sida joogtada ah loogu noolyahay:

- Goobaha dabka iyo mariinada qiiqa waa in sannad kasta la nadiifiyaa

Guryaha wakhtiga firaaqada (tusaale ahaan guryaha lagu xagaabaxo (kesämökki))

- Goobaha dabka waa in la nadiifiyaa ugu yaraan saddexdii sano mar. Goobaha dabka ee joogtada loo isticmaalayo mariinadooda qiiqa waxaa habboon in marar ka badan la nadiifiyo, xattaa sannadkii hal mar.

Dambaska u kaydi sida ku habboon

Taxaddar ka yeelo markaad la falgalayso dambaska. Waxaa macquul ah in dambaska uu ku dhex jiro meelo uu dab ku jiro oo uu ku waaro maalmo dhan.

- Dambaska qabooji oo damintiisa biyo u isticmaal.
- Dambaska waxaad ku dhex ridaa weel bir ah oo dabool leh. Weelka birta ah ku keydi bannaanka meel aanan gubaneynin, tusaale ahaan ha dhigin barandaha alwaaxa ah.





Mariinada jaranjarta ee dhismaha dabaqa ah ha dhigin alaab

Sharciga badbaadinta mamnuuc ayaay ku tahay in alaab lagu kaydiyo mariinada jaranjarta ee dhismeyaasha dabaqa ah. Waa maxay sababtu?

- Haddii uu dab ka kaco dhismaha meelaha lagaga baxo dhismaha ee ugu badbaadada badan sida caadiga ah waa mariinada jaranjarta. Alaabta la dhigo sida gawaadhida ilmaha lagu riico, socod caawiyeyaasha iyo roogaga albaabada la hordhigo waxaay dhibaateynayaan ka bixidda dhismaha iyo waxqabadka dabdamiska.
- Mariinka jaranjarta alaabta dheeraadka ku ah ee la dhigo wuxuu dhalinayaa qiiq sun ah marka uu gubto, qiiqaasina wuxuu si degdeg ah u buuxinayaa mariinka jaranjarta ee dhismaha.

Haddii aad ku khasbanaato inaad ka baxsato dhisme gubanaya oo aad u baxsato mariinka jaranjarta, xidh albaabka gurigaaga.

Maxay tahay in la sameeyo, haddii dhismaha dabaqa ah mariinkiisa jaranjarta uu qiiq qabsado?

Dhismeyaasha dabaqa ah qaabka loo dhisay waa in qiiqa ama dabku aanu si fudud ugu kala faafin guryaha ku yaalla dabaqa. Sidan yeel:

- Gurigaaga gudhiisa ku jir albaabkuna ha kuu xidhnaado, sababta oo ah in qiiqa aad neefsato halis ayaay naftaada ku tahay.
- Wac 112 oo u sheeg guriga aad ka soo wacayso.
- Daloolada albaabka bannaanka iyo sanduuqa boostada ku ood tusaale ahaan tuwaal qoyan.
- Haddii gurigaaga uu qiiqu soo galo, iska ilaali inaad neefsato. Dhulka is dhig: u guurguuro barandaha ama daaqad furan hoosteeda. .
- Isku soo jeedi dabdamiyeyaasha badbaadada ka shaqaynaya oo qayli ama gacmahaaga u haadi.
- Sug caawimaadda.

Shamacyada, laambadaha yaryar iyo dabka bannaanka laga shido

Marka lagu jiro wakhtiga mugdiga ah shamacyada, laambadaha yaryar iyo dabka bannaanka laga shita waxaay keenaan jawi iyo iftiin.



Laambadaha bannaanka iyo dabka bannaanka laga shido

- Dab ha ka shidin barandaha ma qaybta hoose ee bannaanka dhismaha.
- Dabka bannaanka weel adag dhex dhig oo dhig meel aanan gubanaynin oo in ku filan u jirta dhismaha. Shamacyada bannaanka la dhigto laguma talinayo in la dhigto jardiimooyinka ku hor yaalla guryaha magaalada ku yaalla. Waa in iyaga la dhigaa meel dhismaha u jirta ugu yaraan 5–10 mitir.
- Carruurta iyo xayawaanka ka fogee dabka bannaanka laga shido iyo laambadaha dabka.
- Haddii ay dabayl badan jirto ama roob badan da'ayo, ha isticmaalin laambadaha ama dab haka shidin bannaanka. Dabayshu waxaay keeni kartaa in weelku uu rogmo oo roobkuna uu khatar daadasho ah uu keeno.
- Dami laambadaha ama dabka bannaanka ka shidan markaad goobta ka tagayso.
- Ka warhay in agabka damba lagu daminayo (tusaale ahaan bustaha damba lagu daminayo iyo agabka dabka lagu buufinayo) ay kuu dhowyihiin oo si fudud aad u heli karto.

Xasuuso arrimahan:

Shamacyada

- U isticmaal kaliya goob aan guban karin shamacyada iyo laambadaha yaryar. Hubi in aanay u dhawayn daahyada, qalabka guriga ama agabka kale ee si fudud u guban kara.
- Boos ku filan u dhaxeysii shamacyada iyo laambadaha yaryar. Laambadaha yaryar ee aad si isku dhow dhigto waxay wada yeellan karaan hal olol oo wadajir ah taasoo keeni karta dab inuu ka kaco.
- Shamacyada iyo laambadaha yaryar guriga ka dhig meel aan carruurta iyo xayawaanka guriga lagu xanaaneeyo aanay gaari karin.





Haddii uu dab kaco sida ay tahay in la yeelo

Haddii uu dab kaco u dhaqdhaqaaq si dagdag ah oo go'aan qaadasho leh.

Xajiso alaabta kuugu muhiimsan sida fureyaasha, taleefanka, boorsada lacagta oo meel kaa ag dhow ha yaallaan si aad si degdeg ah ugu qaadan karto.

- Isku day inaad dabka ku damiso bustaha dabdamiska ama agabka dabka lagu buufiyo. Haddii dabdamiskaaga hore uu awood fiican leeyahay waxaad ka hor tagi kartaa in dabku sii faafo oo dhaawac wayn uu ka dhasho.

Ka warhay ammaankaaga: haddii uu dabku u faafo qaab aanad maamuli karin, ha isku dayin inaad damiso. Ka bax guriga markaaba oo ku caawi dadka kale ee guriga ku jira inay ka baxaan.

- Markaad dhaqdhaqaaqayso guriga guurguuro sababta oo ah kuleylka iyo qiiqu kor inay u kacaan ayaay ku dadaalaan.
- Markaad guriga ka baxayso albaabada iyo daaqadaha xidh.
- Dabaqa markaad ka baxayso jaranjarta mar. Illaa bannaanka u bax oo ha ku dhex hakan dhismaha.
- Markaad meel ammaan ah oo bannaanka ah joogto wac gurmada degdegga ah 112.
- Baabuurta dabdamiska ku hag inay goobta yimaadaan.

Carruurta bar oo la tababaro xirfadaha badbaadada

Xirfaddaha badbaadada waxaa la bartaa carruurnimada. Waxaa wanaagsan in la tababarto oo dib loogu noqdo.

Ka warhay badbaadada guriga marka ay guriga ku noolyihiin carruur ama da'yar:

- Hubi in guriga ay ka jiraan labo meel oo badbaado ah oo laga bixi karo. Bar xubnaha qoyska oo dhan goobaha laga bixi karo haddii uu dab dhasho. Goobahaas si wadajir ah tababar ugu sameeya.
- Agabka dabka lagu damiyo sida bustaha dabka lagu damiyo iyo agabka dabka lagu buufiyo guriga soo dhigo. Bar carruurta iyo da'yarta isticmaalkoosa. Agabka dabka lagu damiyo dhig meel ay fududahay in laga helo oo lagu isticmaali karo.
- Ka warhay in kabriidada iyo agabka kale ee dabka laga kiciyo aanay oollin meel ay carruurtu ka gaadhi karaan.
- Shamacyada, laambadaha dabka iyo faynuusyada waxaad shiddaa oo kaliya marka uu qof wayn guriga joogo ee la kormeerayo.

Xubnaha qoyska oo dhan taleefankooda ku soo daji aaladda 112 Suomi oo bar sida loo isticmaalo marka xaalad kedis ah la galo.



Ku talagal khalkhalada iyo xaaladaha kediska ah ee kala duwan



Marka wax caadiga ka baxsan uu dhaco sarkaalada dowladda iyo ciddii kale ee mas'uulka ka ah ayaa xallinaysa xaaladdaas.

Si kastaba laakiin waa muhiim in qof kastaa uu diyaar ahaado oo uu la yimaaddo waxqabad horumarinaya in xaaladdaas laga baxo.

Xaaladaha diyaar ahaanshaha u baahan tusaale ahaan waxaa ka mid ah

- Korontada iyo biyaha oo joogsada
- Khalkhalada ku yimaadda isticmaalka laynada taleefanka iyo internetka
- Dhacdooyinka bey'adda sida duufaanada iyo fatahaadda biyaha
- In maaddo khatar ah ay faafto
- Xaaladaha dhibka kediska ah keena ee muddo dheer jira sida bandhemiyada iyo dagaalada

Diyaar ayaad tahay markaad haysato

- **agab guriga kuu yaalla oo aad isku bixin karot**, kaas oo ah cunto, biyo iyo agabka daruuriga ah ee loo baahanyahay oo ku haynaya ugu yaraan 3 maalmood
- **aqoon iyo xirfad waxqabad oo aad ku dhaqmi karto**, markaad gasho xaalad caadiga ka baxsan
- **awood waxqabad oo jismi iyo nafsi ah**
- **bulsho inaad ku xidhantahay** taas oo ay macnaheedu tahay inaad dad kale ku xidhantahay oo aad awooddo inaad caawiso dad kale

Xaalado badan ayaad ka bixi kartaa, markaad sidan u dhaqmi karto:

- Markaad is dejiin karto.
- Ka fikir xaaladda jirtaa nooca ay tahay iyo hagitaanada aad ka warqabto ee la xidhiidha iyo sida ay xaaladdaasi u saameyn karto naftaada, dadka kuu dhow iyo nawaaxiga aad joogto dadka ku sugan.
- U hoggaansanoow hagitaanada iyo isgaarsiinta sarkaalada.
- Liis ka sameyso arrimaha ugu muhiimsan ee ay tahay in xaaladdaas lagu sameeyo oo ku dhaqaaq waxqabadkaas.
- Inta aad awooddo caawi dadka kale oo markaad u baahantana caawimaad codso..
- Haddii aad u baahantahay caawimaad degdeg ah, wac lambarka gurmada degdegga ah ee 112.

Ka akhriso macluumaad dheeraad ah oo diyaargarowga ku saabsan suomi.fi/varautuminen | pelastustoimi.fi/pelastustoimi/varautuminen

Waxaa mar walba Finland diyaar loogu yahay badbaadinta shacabka

Badbaadinta shacabku waa waxqabad insaani ah oo lagu difaacayo laguna badbaadinayo dadka shacabka ah oo lagu sugayo waxqabadka bulshada haddii xaalad dagaal ah ay dhacdo. Xaaladaha shacabka lagu badbaadinayo marka lagu jiro sarkaalada dowladda ayaa ka warbixinaya oo dadka hagaya.

Sarkaalada badbaadada ku shaqada leh waxqabadyada ay ku badbaadinayaan shacabka waxaa ka mid ah inay u digaano, inay daadgureeyaan, inay ku difaacaan goobaha badbaadinta dadwaynaha iyo inay leeyihiin waxqabadka dabdaminta iyo badbaadinta.

Dhismeyaasha goobaha dadwaynaha lagu difaaco ee ku yaalla iyo magaalooyinka goobaha dadwaynaha ee difaaca ah ee ku yaalla waa la diyaariyaa si loo isticmaali karo oo laysku badbaadin karo, haddii sarkaalada badbaadada ku shaqada leh ay sidaas amraan. Goobaha difaaca dadwaynaha waxaa laga galaa tusaale ahaan qaraxyada, in dhismeyaashu ay dumaan iyo maaddooyinka khatarta ah. Calaamadda goobta difaaca dadwaynaha lagu garto waa saddexgees dhinac kasta u siman oo buluug ah oo ku guuntiisu ay oraanj tahay.

Waxaa lagu dadaalayaa in noloshu la sii wado xattaa marka lagu jiro xaalado dagaal, khasabna ma aha in dadka la daadgureeyo haddii nawaaxigaas dadka ku nool siyaabo kale loo badbaadin karo ama loo difaaci karo. Sarkaalada dowladda ayaa haggitaan ka bixinaya oo ka warramaya haddii goobahaas loo baahdo in laga baxo.

Macluumaad faahfaahsan oo ku saabsan goobaha difaaca dadwaynaha ee nawaaxiga aad ku nooshahay iyo badbaadinta dadka waxaad ka heli kartaa bogga internetka ee xarunta badbaadinta oo ah pelastustoimi.fi

